

# 2023

## Dheefaha Magaalada Seattle ee Fudud

(Shaqaalaha hela *Caymiska Daboolida\** Dab demiska)

**U qalmida:** Shaqaaleysiinta cusub iyo kuwa ku tiirsan, caymisku wuxuu bilaabanaayaaa maalinta ugu horeysa ee shaqadaada haddii taariikhdaas ay tahay maalinta koowaad ugu ee bisha loo qoondeeyay inay tahay maalin ganacsiga magaalada. Ama caymisku wuxuu bilaabaanayaa maalinta koowad ee bisha loo qoondeeyay ama loo aqoonsaday maalinta ugu horeysa ee shaqada gaar ahaan shaqada aad ka shaqeyso. Haddii shaqadaadu ay bilaabato taariikhdaan kadib, caymiskaagu wuxuu bilaabanayaa maalinta koowaad ee bisha soo socota.

**Dadka U qalmidu ku tiirsan tahay:** Shaqsiyaadka u qalma caymiska waxaa kamid ah xaaskaaga ama lamaanahaaga guriga, ilmaha aad dhashay ama kuwa aad soo korsatay, carruurta uu dhalay lamaanahaaga guriga, carruurta lamaanahaaga, iyo ilmo kasta oo aad ka tahay mas'uulka sharci ama ilmaha Amarka Taageerada U qalmida Caafimaadka uu dhigaayo in laga daboolo adeegyada. Carruurta waawayn waxay u qalmaan caymiska haddii ay ka yar yihiin 26 sano. Haddii aad ku darto ilmo ku tiirsan caymiska, waxaa lagu waydiin doonaa dukumiintiyada si aad u caddeeyso inay u qalmaan caymiska Qorshooyinka Magaalada Seattle.

**Isdiwaangelinta:** Waa inaad isdiwaangeliso 30 maalmood gudahood kadib marka aad hesho shaqada.

### Caafimaadka, Adeegyada ilkaha, iyo Araga:

Caymiska Daryeelka Caafimaadka waxaa laga heli karaa Seattle Fire Fighters Healthcare Trust.

### Flexible Spending Accounts (FSA, Akoonada

**Kharashaadka ee Dabacsan):** Magaaladu waxay bixisaa Daryeel Caafimaad iyo Daryeelka Maalinlaha ah ee FSA iyadoo loo marayo Xalka Dheefaha Navia. Daryeelka Caafimaadka FSA wuxuu kuu oggolaanayaa inaad isticmaasho doolarka cashuurta kahor si aad u hesho lacag celinta lagu helo kharashka caafimaadka, ilkaha, iyo kharashka aragga ee aad xaq u leedahay. Daryeelka Maalinlaha ah ee FSA wuxuu kuu oggolaanayaa inaad hesho lacag celinta lagu helo kharashka u qalma kharashaadka daryeelka maalinlaha ah ee cunugaaga kugu tiirsann ee jira ilaa da'da 13, lamaanaha naafada ah/lamaanaha guriga, ama waalidka kugu tiirsan.

Waxaad dooran kartaa ugu yaraan \$120 ilaa \$2,850 sanadkiiba oo ah daryeelka caafimaadka FSA iyo \$5,000 oo ah qorshaha daryeelka maalinlaha ah. Haddii aad doorato inaad ka qaybgasho qorshahaan oo aadna dooneyso inaad sii wadato ka qaybqaadashadaada, waxaad u baahan doontaa inaad dib isku diiwaangeliso sannad kasta inta lagu jiro xilliga diiwaangelinta furan ee Magaalada.

Waxaad qaadan kartaa ilaa \$610 oo ah lacagaha FSA ee aan Caafimaadka loo isticmaalin laga bilaabo caymiska sanadka 2023 ilaa caymiska sanadka 2024 ilaa inta ay natiijada qaadashada ka dhalanayso cabbirka koontada ugu yar ee ah \$120.

**Caymiska Naafonimada ee Muddada Dheer:** Ururka Dab-demiska Seattle ee Local 27 wuxuu bixiyaa caymiska Naafonimada Muddada Dheer. Diiwaangelintu waa qasab. Wac (206) 285-1271 si aad u hesho xog.

**Shuruudaha Aasaasiga ah ee kooxda ee Muddada Caymiska Aasaasiga ah ee Nolasha:** Waxaad mid ka dooran kartaa labada qorshe - Kooxda Aasaasiga ah ee

Muddada Caymiska Nolasha oo ah hal-jeer iyo bar dakhligaaga sanadlaha ah ama Shuruudaha Aasaasiga ah ee xadidan ee kooxda ee Caymiska Nolasha oo ah \$50,000. Magaaladu waxay bixin doo40% ee kharashka Caymiska Nolasha Muddada ee Kooxda Aasaasiga ah.

### Caymiska Dheeraadka ah ee Muddada Nolasha ee Kooxda Aasaasiga ah:

Haddii aad dooratay muddada Nolasha ee kooxda aasaasiga ah, waxaad iibsana kartaa caymis nololeed dheeraad ah, waxaadna u iibin kartaa xaaskaaga/ lamaanahaaga guriga, iyo carruurtaada. Caymiska nolasha ugu badan ee aad heli karto waa afar jibaar dakhligaaga sanadlaha ah. Xaaskaaga/Lamaanahaaga guriga waa 100% cadadka caymiska aad adigu doorato oo ah ilaa ugu badnaan \$500,00. Waxaad u iibsana kartaa Caymiska Caruurtaada oo ah \$2,000, \$5,000, ama \$10,000.

### Dhimasho shil ah iyo Kala fogaanshaha

**Caymiska (AD&D):** Waxaad iibsana kartaa caymiska AD&D ama waxaad u iibin kartaa qoyskaaga. Caymiska la heli karo wuxuu ka bilaabanayaa \$25,000 ilaa \$500,000.

\*Waxaa kujira xubnaha Ururka Dab-demiska Seattle ee Local 27

## Dheefaha Hawlgabka

Waaxda Gobalka Washington ee qaabilsan Nidaamyada Hawlgabka: Kamid ahaanshaha nidaamka hawlgabka Waaxda Gobolka Washington waa qasab. Si aad u hesho xog ku saabsan caymiskaaga, fadlan la xirii Waaxda Nidaamyada Hawlgabka ee Gobolka Washington. Waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad kayd badan gashato hawlgabkaaga adoo u mraaya Qorshaha Dib u dhista dakhliga ee Ikhtiyaariga ah (hoos eeg).

**Qorshaha Dib u dhista dakhliga ee Ikhtiyaariga ah:** Diiwaangelinta Qorshaha Magdhawga Dib loo dhigay ee

City's 457 waa ikhtiyaari. Waxa lagu oggol yahay inaad wax ku darsato ayadoo loo maraayo mushaar dhimis. Adiga ayaa go'aaminaya cadadka doolarka, nooca wax ku biirinta, iyo fursadaha maalgashiga. Waxa laga yaabaa inaad ku darsato ugu yaraan \$10 oo laga jaraayo mushaar halkii jeeg. Isbadelada diiwaangelinta iyo wax ku darsiga waxaa la sameyn karaa waqti kasta. Magaaladu kuma eka waxa aad ku darsanayso.

## Dheefaha iyo Barnaamijyada Shaqada/Nolasha

**Employee Assistance Program (EAP, Barnaamijka Caawimaada Shaqaalaha):** Ilaha Nolasha EAP waxay bixiyaan soo gudbin iyo adeeg tallo oo adiga iyo xubnaha qoyskaaga aad helayaan. Hel caawinaad sir ah oo ku saabsan arrimaha gaarka ah sida walwalka, niyad jabka, iyo dhibaatooyinka qoyska iyo xiriirka. Xubin kasta oo qoyska ka tirsan waxa uu xaq u leeyahay lix kulan oo hal saac ah ahna bilaash sannadkiiba.

**Gaadiidka:** Dab damiyaasha Seattle waxay u qalmaan gaadiid ay raacaan oo bilaash ah oo ay bixiyaan hay'd gaar ah marka ay muujiyaan calaamadooda. Dab damiyaashu waxay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan walxaha kale ee MyTrips ee barnaamijka ikhtiyaarka safarka shaqaalaha oo ay kujiraan kaalmada qorsheynta safarka, baabuurta la isla raaco iyo kuwa la wadaago, iyo kuwo kale oo badan.

**Career Quest:** Career Quest wuxuu bixiyaa fursado lagu horumirnaayo xirfadaha oo habboon si loo ballaariyo xirfadahaaga ama lagaaga caawiyo yoolalkaaga shaqo ee muddada-dheer. Si aad ugu qalanto, waa inaad tahay Shaqaale Magaalo oo joogto ah, aadna shaqeysay ugu yaraan hal sano, iyo ayna kaa go'an tahay inaad hesho xirfado iyo tayo cusub.

**Fasaxyadaa:** Magaaladu waxay leedahay 12 fasax oo rasmi ah iyo 2 fasax oo shaqsi. Waxaad qaadan kartaa fasaxaag shaqsi waqti kasta kadib marka aad oggolaansho ka hesho kormeeraha.

**Dalxiiska:** Waxaad aruursanaysaa fasax ku saleysan saacadaha heerka mushaarka caadiga ah. Tirada fasaxu wuxuu ku xiran yahay muddada adeeggaaga - laga bilaabo 12 maalmood sannadkii ee shaqaalaha cusub ilaa 30 maalmood sannadkii kadib 29 sano marka qofku shaqeeyo. Saacadaha fasaxa ee aan la isticmaalin waxay sii socdaan sanad kasta, ilaa inta ugu badan, taas oo ku xiran sanadaha adeegga.

**Fasaxa Xanuunka:** Waxaad aruursanaysaa fasaxa xanuunka lagu helo oo lagu saleeyay tirada saacadaha aad shaqeysay. Shaqaalaha waqtiga buuxa waxay helaan 96 saacadood oo fasaxa xanuunka ah sannadkii. Waxaa laga yaabaa inaad hesho fasaxaaga xanuunka ee aadan isticmaalin, ma jirto wax uruurin ah oo ugu badan.

**Fasaxyada kale:** Magaaladu sidoo kale waxay bixisaa fasaxyadaan soo socda ee lacagta lagu bixiyo kuwaan aan lagu bixin: Fasaxa waalidka oo lacagta lagu bixiyo,

fasaxa tacsida, fasaxa qoyska iyo caafimaadka, naafanimada uurka, waajibaadka xeerbeegsiga, fasaxa waajibaadka milatariga, fasaxa marka aad ku deeqeyso unug jir, fasax shakhsi oo aan mushaar lahayn, iyo fasaxa hawlaha gaarka ah.

Shaqaaluhu sidoo kale waxay haystaan ikhtiyaarka ah inay codsadaan Barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Lacagta lagu bixiyo ee Washington marka laga imaado fasaxyada kore ee ay magaaladu bixiso.



**Seattle**  
Human Resources

*Waxaa la cusbooneysiisay 12/16/2022*